# MACLUUMAAD LOOGU TALOGALEY WAALIDIINTA IYO ARDEYDA

**Dugsigeenna wuxuu ka-qeybgalayaa Sahanka Dhallinyarada Caafimaadka qabta inta lagu guda jirro Dayrtan.**

Sahanka wuxuu qofka weydiinayaa su'aalo ku saabsan khataraha dhaawaca, natiijooyinka caafimaadka, iyo isticmaalka khamriga iyo daroogada. Dugsiyada, iyo hay'adaha dowladda iyo kuwa degaanka waxay u isticmaalaan natiijooyinka ka soo baxa sahanka in ay ku taageeraan dhallinyaradeenna oo ayna ku yareeyaan khataraha. Sahanka Dhallinyarada Caafimaadka qabta waa sahan ikhtiyaari ah oo aan magac la sheegin wuxuuna bixiyaa macluumaad muhiim ah oo lagu hagayo siyaasadda iyo barnaamijyada u adeegga dhallinyaradeenna.

*Fadlan la wadaag macluumaadkan ardeygaaga*
*Ka-dibna kala hadal sahanka waxaadna go'aamisaa haddii ardeygaaga uu ka qeybgalayo.*

**Su'aasha: Kumaa la weydiin doonaa in uu qaato sahanka?**
**J:** Ardeyda dhigata Fasallada 6,8,10, iyo 12 ee wax ka barta Gobolka Washington oo dhan iyo ardeyda dhigata Fasallada 7, 9 iyo 11 ee dhigta degmooyinka dugsiga ee yaryar.

**Su'aasha: Sahanka ma yahay mid ikhtiyaari ah?**
**A:** Haa! Ardeyda qaadanaysa sahanka waxay ka gudbi karaan su'aalaha waxayna joojin karaan qaadashada sahanka wakhti kasta. Haddii aadan doonayn ardeygaaga in uu ka qeybgalo sahanka, waxaad waci kartaa dugsiga si aad ugu cudurdaarto ardeygaaga. Ardeyda waxay sidoo kale u sheegi karaan macalinkooda in aysan doonayn in ay qaataan sahanka. Ardeyda aan qaadanayn sahanka waxay ka qaybgalayaan waxqabadyo kala duwan, sida in ay wax ku bartaan ama akhriska maktabada. Ma jirto wax ciqaab ah oo uu ardeygu muteysanayo haddii uusan ka qeybgalin sahanka. Darajooyinka ardeydaada lama saameyn doono.

**Su'aasha: Waa maxay su'aalaha ku qoran sahanka?**
**J:** Su'aalaha sahanka waxay ka imaadaan sahannada dalka oo dhan iyo kuwa Washington. Waalidiinta ama mas'uuliyiinta waxay la soo xiriiri karaan xafiiska iskuulkooda si ay u arkaan nuqulka su'aalaha qoraalka ah ama si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan su'aalaha ku qoran www.askhys.net.

Mowduucyada qaarkood waxaa ka mid ah:

- Macluumaadka, sida da'da, jinsiga, isirka iyo sinjiga
- Dareennada ku saabsan dugsiga iyo bulshada
- Xiriirrada lala leeyahay waalidiinta, saaxiibada, iyo deriska
- Dabeecadaha wax cunista, dhaqdhaqaaqa jirka
- Waxbarasho caafimaad
- Hab-dhaqanka ku saabsan iyo isticmaalka tubaakada, khamriga iyo daroogada kale
- Dabeecadaha iyo dareennada la xiriirra ammaanka
- Dabeecadaha la xiriira rabshadaha
- Aqoonsiga jinsiga (nuqul la fududeeyay oo ikhiyaari ah ayaa loo heli karaa Fasallada 6aad iyo 7aad*)
- Dookha galmo (looguma talogalin Fasallada 6aad iyo 7aad)
- Habdhaqanka galmo, xadgudubka iyo dhiigmiirashada (looguma talogalin Fasallada 6aad iyo 7aad)

* Haddii ay iskuullada si gaar ah u doortaan in ay su'aashan weyddiiyaan mooyaane, ardeyda lama weyddiin doonno in ay sheegaan aqoonsiga jinsigooda.

**Su'aasha: Sidee loo ilaaliyaa aqoonsiga ardeyga?**
**J:** HYS had iyo jeer waa ikhtiyaari, ardeydanna magacyadooda kuma qori doonnaan sahanka. Ma jiraan summado ama xog ku jira sahanka oo ardeyga lagu aqoonsan karo. Ma jirto cid ka socota iskuulka oo jawaabahooda eegi doonna. Ardeyda si sir ah ayay u soo gudbin doonnaan sahankooda oo dhammeystiran marka ay dhammeeyaan.
Haddii ay jiraan helidda jawaabaha ardeyga oo aan la oggolayn, qof ayaa isku-dayi kara in uu aqoonsado ardey gaar ah isaga oo adeegsanaya xogta sida iskuulka, fasalka, iyo isirka/sinjiga. Si kastaba ha ahaatee, waxaan si dhab ah u qaadanaa arrinta sir ahaanshaha waxaanna jira dhowr tallaabo oo aan adeegsano si aan uga hortagno helidda aan la oggolayn ee jawaabaha ardayga iyo si loo xaqiijiyo in xogta xasaasiga ah ee lagu soo ururiyay sahanka in ay ahaanto mid magac la'aan ah. Waxaad wax badan ka oggaan kartaa halkan: https://www.AskHYS.net/HYS/HYSInformation

**Su'aasha: Sidee loo isticmaalaa natiijooyinka sahanka?**
**J:** Dugsiyada, degmooyinka dugsiga, hay'adaha dowladda iyo kuwa degmooyinka waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay u fahmaan ardeydeenna oo ayna u siiyaan adeegyada ay u baahan yihiin. Natiijooyinka waxaa loo isticmaalaa qorsheynta, qiimeynta, iyo sii wanaajinta barnaamijyada, iyo helidda lacagta lagu taageerayo. Xog magac la'aan ah ayaa sidoo kale lala wadaagaa waaxaha caafimaadka degaanka, Xarumaha Cudurrada Faafa ee Qabiilka, iyo cilmi-baariyaasha la ansixiyey.

**Ma u baahan tahay macluumaad badan?**
Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ujeeddada sahanka ama habraacyada sahanka"

- Wac telefoonka bilaashka ah ee 1-877-HYS-7111
- Iimayl healthy.youth@doh.wa.gov

Macluumaad ku saabsan Sahanka Dhallinyarada Caafimaadka qabta waxaa laga heli karaa: www.AskHYS.net

Guddiga Dib-u-eegista Hay'adeed ee Gobolka Washington wuxuu oggolaadey habraacyada Dhallinyarada Sahanka Caafimaadka qabta ee lagu sharxay waraaqdan. Haddii aad aaminsan tahay in habraacyadan la raacin, fadlan wac 1-800-583-8488. Ma aha in aad ka tagtid magacaaga. Farriimaha oo dhan waa la soo celin doonaa.

**Ardeydu waxay qaadanayeen Sahanka Dhallinyarada Caafimaadka qabta tan iyo 2002. Tirada ardayda ayaa ka kordhay dhowr kun oo arday waxayna gaartay in ka badan 230,000 sannadkii!**

*Waad ku mahadsan tahay in aad dib-u-eegto macluumaadkan iyo in aad kala hadasho ardeygaaga!*

*Sahanka Dhallinyarada Caafimaadka qabta waxaa taabogaliyey hay'adahan dowladda ee soo scoda: Maamulka Daryeelka Caafimaadka – Qaybta Caafimaadka Hab-dhaqanka iyo Bogsashada, Waaxda Caafimaadka, Xafiiska Kormeeraha Waxbarashada Guud, iyo Guddiga Khamriga iyo Xashiiska.*